

**Xeerka Maamul, ee 31 Disember 1958, lamba. 171, diw.  
Kala-diridda Golaha Xeerdejinta.**

#### **MAAMULAHA**

Markuu arkay Amar/gooyada 4<sup>ta</sup> Jennaayo 1956, lamba. 1 “Golaha Xeerdejinta”;  
Markuu arkay Sharciga 1<sup>da</sup> Agoosto 1958, lamba. 24, waxa uu dhammaadka muddada Golaha Xeerdejinta ku cayimayaa 31 Disember 1958;  
Markuu arkay Sharciga doorashada siyaasiga, ee 12 Disember 1958, lamba. 26 oo taariikhda ay dhacayso codbixinta xagga doorashada Goaha Xeerdejinta cusub u cayimeysa maalmaha 1 – 5 Maarso 1959;  
Markuu arkay sharciga 29 Disember 1958, lamba. 31 oo fareysa in la wado sii-shaqaynta Xafiiska Guddoonka Golaha Xeerdejinta ilaa isugu yeerista Golaha cusub;  
Markuu garwaaqsaday in ay tahay in sadaas awgeed lagu dhaqaaqo kala-diridda Golaha Xeerdejinta oo hadda xilka haya;  
Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;  
Ayada oo ku saleysab soo-jeedinta Wasiirka Kowaad, asaga oo kula heshiis ah Wasiirka Arrimaha Gudaha;

#### **WUXUU XEERAYAA**

Golaha Xeerdejinta oo xilka haaya waxaa la baabi'iyey taariikhda maanta.  
Muqdisho, 31<sup>ka</sup> Disember 1958.

Maamulaha

**Mario Di Stefano**

**Cabdullahi Ciise Maxamuud**

**Xaaji Muuse Boqor**